

Nikaax & wadanoolaansho

Haddaad dooneyso inaad ku guursato habka madaniga ah waxaad la xiriireysaa qabanqaabiyaha arrimaha meherinta ee degmada Flen si aad isugu afgarataan goorta iyo meesha xafladda meherka lagu qabanayo.

Waxaad kaloo la xiriiri kartaa xafiiska canshuuraha iyo diiwaangelinta dadweynaha si aad uga codsato ruqsadda inaad guursan karto. Arjiga codsiga waa la buuxinayaa oo kadibna loo dirayaa xafiiska Hay'adda canshuuraha.

Xataa lammaanaha ajnebiga ahi waa in ay haystaan caddayn in aysan jirin guurkooda hortaagan ama haddii labada midkood uusan ka diiwaangeshanayn Iswiidhen. Warbixinaha oo dhan waxaa laga helayaa Hay'adda canshuuraha.

[Xafiiska wargelinta canshuuraha iyo diiwaangelinta](#)

[Foomamka ruqsadda guurka](#)

Intaas kadibna waxaa guriga laguugu soo dirayaa caddaynta ruqsadda guurka iyo caddaynta nikaaxa. Caddaymahaasna waxaa u gudbineysaa ama u direysaa isuduwaha degmada u qaabilsan arrimaha nikaaxa. Kuwaana waxaa kadib loo isticmaalayaa baratokoolqorista iyo shahaadada nikaaxa. Xasuuusnow in caddaymahaas la isticmaali karo 4 bilood oo qura.

Marka nikaaxu dhacayo waa in ay goobjoog ka ahaadaan laba markhaanti oo da'doodu ka weyn tahay 18 sano. Kuwaasina waxay noqon karaan qaraabada ama saaxiibada lammaanaha. Waqtiyada aqalka maamulka degmadu furan waxaa markhaanti laga dhigan karaa shaqaalaha aqalka degmada. Isku meherinta madaniga ahi lacag la'aan ayey ka tahay degmada Flen.

Qofka dadka isku meheriya ee degmada Flen

Meherka ama nikaaxa madaniga ah waxaa qabta qof aan kaniisadda ku xirnayn oo uu magacaabo maamulka gobolku.

Xafladda nikaaxa oo lagu qabanayo aqalka degmada Flen

Lammaanaha ay isnikaaxsanayaa waxay kala dooran karaan laba hab oo nikaax ah – mid dheer iyo mid gaaban. Nikaaxu wuxuu ka dhacayaa maktabadda Järnvägshotellet, oo loogu yeero "Qolka Boqorka", oo ku taal xafiiska dalxiiska ee dabaqa hoose. Nikaaxyada waxaa la qabanqaabiyaa saacadaha shaqada iyo fiidadkii iyo maalmaha fasaxa, taas oo ku xiran heshiiska lammaanaha iyo nikaaxqabanqaabiyaha.

Xaflad nikaax oo lagu qabanayo meel kale

Waxaan kaloo diyaar u nahay in nikaaxaas ku qabanno meel kale oo aan ahayn aqalka degmada. Taasina waxay dhacaysaa kadib marka ku heshiiyaan lammaanaha iyo nikaaxqabanqaabiyaha.

Warbixin

Nikaaxqabanqaabiye

Jessica Ekermann

jessica.ekermann@flen.se

0157- 43 00 02

Hay'adda canshuuraha

0771-567 567

[Webbplats](#)

Wagtiga telefoonka:

isniin-khamiis, saacadaha 8-19

jimce saacadaha 8- 16

Wasaaradda arrimaha dibedda

08 – 405 10 00

[Webbplats](#)

▪ Ma dhowaan ayaad Iswiidhen timid oo dhibaato ayaad ku qabtaa luuqadda?

La xirii xafiiska degmada u qaabilsan qaabbilaadda dadka dhowaan yimid, "**Kompassen**", si aad ballan uga qabsato Amir oo ku sii gudbin doona.

Amir Ibrahim Ahmed

0157-43 04 52